


KAYDSO TAMARTA

- Oo isku fillaysii qasnadda qoyska

Qolka xamaamka/wax dhaqid

- Qubayso halkii aad kaga dabbalan lahayd darka. Iska xidhi tuushka marka aad saabuunta marsanayso.
- Wakhtiga maydhashada oo aad ka soo gaabisaa min 10 daqiiqo ilaa 5 daqiiqo waxa ay nus ka dhigaysaa isticmaalidda tamarta iyo biyaha.
- U dayactir ama u bedel sida ugu dhakhsaha badan qasabadaha tifiqlaynaya iyo musqulaha da'aya.
- Yaanay biyuhu iska socon marka aad cadayanayso – oo kaydi darka muggii oo biyo ah wiigii.
- Ku maydh qaasaladda oo buuxda, waxaanad isticmaashaa heer kulka ugu hooseeya ee habboon.
- Wadh dharka aad qallajinayso halkii aad ku qallajin lahayd mashiinka, inta ugu badan ee suurtagalka ah.
- Isticmaal mar walba barnaamijka beekhaaminta marka aad dharka maydhayso.



Jikada

- Qaboojisadu waxay ku taagnaanaysaa heer kulka +5°C, tallaajadduna –18°C.
- Barafka ka gur qaboojisada iyo tallaajadda ugu yaraan hal mar sanadkiiba.
- U nadiifi oo u huufari si joogto ah xagga dambe ee qaboojisada iyo tallaajadda.
- Iskeed u dhalaali cuntada ku barafowday qaboojiyaha, halkii aad ka isticmaali lahayd biyo kulul ama mikrada.
- Cuntada kulul qabooji ilaa ay la mid noqonayso heer kulka qolka inta aanad gelin qaboojisada iyo tallaajadda.
- Weligaa ha isticmaalin digsi ka yar saxanka dabka, mar walbana dabool isticmaal.
- Sida ugu tamar – kaydinta badan ee biyaha loo kulleeyaa waa in aad ku diiriso biyo – kariye ama mikrada.
- Isticmaal forno wax ku dubidda isla marka aad cuntada karinayso.

FELANMÄLAN KAN DU GÖRA

via Mina sidor på www.tunabyggen.se eller i våra receptioner i Tjärna Centrum, på Allfarvägen 63 och vid Jaxtorget. Se aktuella öppettider på vår webbplats
Du kan också felanmäla via telefon 0243-733 50



- Xidh foornada haddii ay madhantahay wax ka badan 30 daqiiqo.
- Weelka ku dhaq – dhaq tashti ama meel godan oo leh fur.
- Ku maydh mishiinka weelka oo buuxa. Isticmaal heer kul hoose, badiyaaba waxa ay keenaysaa natiijo isku mid ah.

Qolka fadhiga/qolka hurdada

- Isticmaal nalalka tamarta beekhaamiya ama nalalka "LED", marka aad qolka ka baxaysana sii demi. Iibsigooda ayaa qaali ah laakiin waxa aad kaga faa'iidaydsaa isticmaalka tamarta oo yaraada!
- U laydhi si wanaagsan adiga oo hawada u furaya wakhti kooban.
- U isticmaal wakhtiyeeeye ifinta dhirta, quraarada kalloonka iyo waxyaalaha kale ee aan u baahnayn in ay daarnaadaan 24ka saac.
- Heer kulka guriga ku hay 20°C, weliba qolka hurdadu ha ka hooseeyo. Haddii aad ka safrayso guriga waxaba ku filan 15°C.
- Ku ururi dhammaan xidhiidhyada korontada, dab qaybiso leh mawjad – xidhe, markaa waxa aad ka baaqsanaysaa in xubinta iska taagnaantu (standby) ay koronto kaa xaddo.
- Ka saar battari – cabbeeyaha iyo gudbiyeyaasha fiishta korontada, marka aan la isticmaalayn.
- U bedel bateriyada ku jira ciyaaraha carruurta kuwa la cabbayn karo.

Isticmaalka korontada

Qalab	Isticmaalka	qarashka sanadkii
Mishiinka weelka	1 mar/maalintii	613 kr
Mikrada	7 daqiiq/maalintii	76 kr
Huufar	1 saac/wiigii	62 kr
Qaboojiye	24 saad/maalintii	200 kr
Tallaajad	24 saac/maalintii	465 kr
Bun-kariye	1 saax/maalintii	350 kr
Qasaalad	2 saac/maalintii	1 752 kr
Dhar qallajiye	1 saac/maalintii	876 kr
Kaawiyad	1 saac/wiigii	62 kr
Timo-qallajiye	1 saac/wiigii	62 kr
Quraarad kalluun	24 saac/maalintii	631 kr
TV (plasma/LCD)	3 saac/maalintii	329 kr
TV (dhuunta-sawirka)	3 saac/maalintii	184 kr
10 laambado if badan	5 saac/maalintii	1 314 kr
10 laambado tamar yar	5 saac/maalintii	241 kr

(Qiimaha korontada ee la xisaabiyey oo khidmadaha oo dhan lagu daray = 1,20 kr/kWh)